

ADIGA iyo ilmahaagu ammaan ma tihiin?

Wehelkaagu...

- ma kugu qayliyaa?
- ma ku caayaa?
- dambi ma kaaga dhigaa uurka?
- ma jajabiyaa alaabtaada?
- ma waxyeelaa ama ma dilaa xayawaankaaga guriga?
- ma ku hanjabaa inuu wax ku yeeli doono?
- markasta ma rabaa inuu isagu xukunka lahaado?
- ma kuu diidaa inaad aragtid saaxiibadaa ama qoyskaaga?
- ma kuu diidaa inaad aragtid dhakhtarkaaga ama umulisada?
- ma xukumaa waxa aad cuntid ama inta aad cuntid?
- ma xukumaa lacagtaada?
- ma ku hanjabaa inuu ilmaha kaa qaadan doono?

Kani waa xumeyn NIYADDA ah.

Waxay keeni kartaa xumeyn ah jidhka.

Nooc kasta oo XUMEYN ahi waxyeelo ayuu kuu keeni karaa.

Xumeynta lagugu sameeyo wakhtiga aad uurka leedahay waxay kuu keeni karta:

- inaad dareentid murugo iyo cidlo
- inaad dareentid walwal
- in niyaddaadu xumaato
- inay ku soo gaadhaan xanuun iyo dhaawacyo
- inaad qaadatid khamri iyo daroogo
- in aanad si fiican wax u cunin ama u seexan
- inuu kaa soo dhaco ilmuhu

...waxana uu ilmahaaga u keeni karaa:

- inuu dhasho isaga oo si weyn u yar
- inuu goor hore dhasho ama soo hormaro
- inuu dhasho isaga oo mayd ah
- inay soo gaadhaan dhaawacyo ama cuduro
- inuu wakhti dambe yeesho dhibaatooyin caafimaad
- in waxyeelo loo geysto ka dib dhalashada

Adiga iyo ilmahaaga...



**Xumeyntu waxay keeni kartaa dhibaatooyin
XIDHIIDH oo dhex mara adiga iyo ilmahaaga.
BADBAADI NAFTAADA iyo ilmahaaga.**

